



# Su'aalaha badanaa Lays-weydiyo

## Soomaali

Adeega Turjumidda Qoraalka iyo Fasiraada (TIS National) waxay soo saartay su'aalaha badanaa la iswaydiyo oo loogu talagalay in luqaddooda looga jawaabo su'aalaha guud dadka aan Ingirisiga ku hadlin.

### Adeegyadde bixisaa TIS National?

TIS National waxay siisaa adeegyada turjumaada dadka aan ku hadlin Ingiriiska iyo hay'adaha iyo ganacsiyada u baahan inay la xiriiraan macaamiisha aan Ingiriisiga ku hadlin. Adeegyadan waxay u suurtageliyan kuwa aan Ingiriiska ku hadlin inay si madaxbanaan u helaan adeegyada iyo maclumaadka Australia.

TIS National waxay heshiis la gashay in ka badan 2500 oo turjumaan Australia gudaheeda kuwaas oo bixiya in ka badan 150 luqadood oo kala duwan.

Dadka aan ku hadlin Ingiriisiga waxay heli karaan turjumaan deg deg ah iyada oo loo marayo TIS National iyagoo wacaya 131 450. Haddii kale, haddii aad la xiriirto hay'ad si toos ah waxay kuu qabanqaabin karaan turjumaan ayagoo ku matalaya.

### Yaan kala xiriiri karaa TIS National?

In ka badan 60,000 oo urur oo ay ku jирто Wasaaradda Arrimaha Gudaha, ayaa ka diiwaangashan TIS National. Qaar ka mid ah macaamiisha kale ee TIS waxaa ka mid ah:

- wasaaradaha dawlad-goboleedyada iyo federaalka
- golayaasha dowladda hoose
- dhakhaatiirta caafimaadka iyo xirfadlayaasha caafimaadka
- Farmashiistayaasha
- shirkadaha korontada
- shirkadaha isgaarsiinta
- Adeegyada degdega ah
- Adeegyada sharciga
- bixiyeyaasha adeegyada dejinta iyo bulshada.

TIS National ma ballan qaadi karto in haya'dda aad u baahan tahay inaad la xiriirto ay aqbalayso wicitaanada turjumaanku caawiyo ee ka socda TIS National.

### Goorma ayaan waci karaa TIS National?

TIS National waxay bixisaa adeegyo turjumaan 24ka saacadood ee maalintii, maalin kasta oo sanadka ah. Haya'ddaha aad la xiriirayso waxay heli karaan oo kaliya inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah, haya'daha shaqaduna saacadaha way ku kala duwan yihiin. Haya'daha badankood ee Australia waxay ku shaqeeyaan saacadaha shaqada caadiga ah inta u dhaxaysa 9 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniinta illaa Jimcaha. Haya'do badan ayaan la heli doonin maalmaha fasaxa dadweynaha.

# Maxaan filanayaa markaan waco 131 450?

1. Ka wac TIS National 131 450. Waxaad maqli doontaa caddaynta gaarnimada ee TIS National.
2. Waxaa lagu weydiin doonaa 'Luqadee ayaa turjumaanku ku hadlaa?' U sheeg luqaddaada.
3. Waxaa lagu weydiin doonaa 'Miyaad tahay macaamiil ganacsii ama macaamiil TIS National?' Waa inaad 'maya' tidhaahdaa.
4. Waxaa laguu wareejin doonaa xiriiriyaha taleefanka ee TIS National oo Ingiriisi ku hadlaya. Intaad sugeysid, waxaad maqli doontaa luqaddaada 'fadlan sug intaan la xiriireyno xiriiriyaha telefoonka.
5. Xiriiriyaha taleefanka ee TIS National ayaa xaqijin doona luqadaada mar kale.
6. Xiriiriyaha telefoonka ee TIS National ayaa ku hakin doona si uu u waco turjumaanka waxaadna maqli doontaa fariinta soo socota ee luqaddaada 'Fadlan sug intaan la xiriirayno turjumaan'.
  - Haddii turjumaan luuqadaada ah la heli karo, xiriiriyaha taleefanka ee TIS ayaa markaa kugula xiriiri doona turjumaanka waxayna ku weydiin doonaan haya'daha aad u baahan tahay inaad la xiriirto.
    - Fadlan hayso oo diyaarso magaca haya'dda, lambarka telefoonakooda iyo lambarka macaamilkaaga ama lambarka acoonkaaga ee haya'dda aad ku leedahay (haddii ay jirto) markaad wacayo TIS National.
    - Turjumaanku wuxuu u sheegi doonaa xiriiriyaha taleefanka TIS National cidda aad u baahan tahay inaad la xiriirto markaasna xiriiriyahu wuxuu sii wadi doonaa wicitaanka iyo inuu adiga iyo turjumaanka ku xiro hay'adda la codsaday.
  - Haddii aan la heli karin turjumaan luuqadaada ah, xiriiriyuhu wuxuu kaa codsanayaa inaad si degdeg ah mar kale u soo wacdid. Haddii aad ku hadasho wax ka badan hal luqad, waxaa laga yaabaa inaad codsato mutarjam luqad kale ku hadla.

## Miyuu xiriiriyaha taleefoonka ee TIS National ama turjumaanku ku talin karaa haya'dda aan la hadlayo?

Maya. Xiriiriyeyaasha TIS National waa inay ahaadaan kuwo dhexdhexaad ah isla markaana aan kugula talin karin haya'daha ay tahay inaad la xiriirto. Markii lagugu xiro turjumaan, turjumaanku kuguma howlgelin doono wada-hadal aan rasmi ahayn maadama ay tahay inuu ahaado dhexdhexaad inta lagu jiro dhammaan hawlahaa turjumaanka.

Fadlan hayso oo diyaarso magaca haya'dda, lambarka telefoonka xiriirkooda iyo lambarka macaamilka ama lambarka acoonkaaga ee haya'dda aad ku leedahay (haddii ay jirto), markaad wacayo TIS National.

## Maxaan sameeyaa haddii aan aqaano turjumaanka aan ku xiranahay?

Haddii aad ogaato inaad taqaano turjumaanka, waa go'aankaaga haddii aad rabto inaad sii wadatid turjumaadda. Haddii aadan rabin inaad sii wadato isla turjumaakii hore, u sheeg xiriiriyaha taleefanka ee TIS ama haya'dda, markaasna aad jojisaa wicitaanka.

## Ma codsan karaa turjumaan lab ama dheddig ah?

Haa. Haddii aad doorbidayso turjumaan sinji gaar ah, u sheeg xiriiriyeyaasha taleefanka ee TIS National ama haya'dda aad la xiriirayso sida ugu dhakhsaha badan. TIS National waxay isku dayi doontaa inay ku siiso turjumaan sinjigaad codsatay ah.

# **Ma dalban karaa turjumaan diin gaara ama asal dhaqan gaara?**

Maya. Xiriiriyeasha Telefoonada TIS ayaa u qoondeeyya shaqooyinka turjumaanada iyadoo ku salaysan Haya'dda Aqoonsigooda Qaran ee Turjumaanada iyo Fasiraayaasha (NAATI) (<https://www.naati.com.au/>) (shahaadooyinka), heerkooda iyo helitaankooda. TIS National ma howlgelin karto turjumaan ku salaysan asalka dhaqanka ama diinta.

## **Waxaan doonayaa inaan isticmaalo turjumaan qof ahaan. Taasi suurtagal ma tahay?**

Haa. TIS National waxay bixisa adeegyo turjumaan oo goobta ah. Haddii aad u baahato turjumaan goobta ah, waa inaad la xiriirtaa hay'adda aad u baahan tahay inaad la xiriirto adoo maraya TIS National adoo isticmaalaya turjumaanka taleefanka waxaadna weydiisaa inay kuu qabtaan turjumaanka goobta ah.

## **Waxaan u baahanahay inaan la xiriiro adeegyada degdeggaa ah. Maxaan sameeyaa?**

Mar walba si toos ah u wac 000 haddii aad u baahato inaad la xiriirto Ambalaaska degdeggaa ah, Adeegga Booliska ama Dabka. Khadka Adeegyada Xaaladda Degdeggaa ah ee 000 ayaa TIS National kuu soo wici doona wuxuuna kugu xirayaa turjumaan adiga oo isticmaalaya khadka mudnaanta ah 24ka saacadood maalintii, maalin kasta oo sanadka ah.

## **Adeegyada TIS ma u lacag la'aan baa dadka aan Ingiriiska ku hadlin?**

Adeegyada TIS ma u lacag la'aan baa dadka aan Ingiriiska ku hadlin?

Haa. Inta badan Adeegyada turjumaanka TIS National waa u lacag la'aan dadka aan Ingiriiska ku hadlin. Guud ahaan haya'daha aad la xiriirayso waxay aqbalaysaa khidmadaha adeegga. Haya'daha qaarkood iyo dhakhaatiirta caafimaadku waxay xaq u leeyihiin turjumaan bilaash ah iyada oo loo marayo TIS National.

Haya'daha qaarkood ma aqbalaan wicitaanada TIS National, si kastaba ha ahaatee haddii aad si toos ah ugu wacdo hay'adda waxay awoodi karaan inay dib kuugu soo wacaan turjumaan taleefan.

Haddii aad rabto inaad la xiriirto hay'ad aan ahayn macaamiilka TIS National oo hay'addu aysan dooneynin inay aqbalasho khidmadaha adeegga, waxaad dooran kartaa inaad sameysid akoon shakhsiyadeed oo aad iska bixiso adeeggaaga. Si arrintan loo sameeyo, u sheeg turjumaanka iyo hawladeenka taleefanka TIS National ayaa kaa caawin doonta inaad abuurto akoon. Wuxaad u baahan doontaa kaarka kareedhitka si aad u abuurto akoon shakhsiyadeed.

## **Ma heli karaa in dokumentiyada la iigu turjumo TIS National?**

Maya. TIS National ma bixiso adeeg tarjumaad dokumentiyada ganacsiga.

Waaxda Arimaha Gudaha waxay siisaa adeeg turjumaan oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka sida joogtada ah u degan Australia. Deganayaasha joogtada ah iyo qaarka haysta fiisooyinka ku meelgaarka ah waxay awoodaan in Ingiriiska loo turjumo ilaa tobantukumentiyada uqalma, labadii sanno ee ugu horreysa ee taariikhda la siiyey fiisaha ay xaqa u leeyihiin.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Adeegga Turjumaanka lacagta ah waxaad ka helaysaa websidka-Waxaad Arimaha Gudaha (<https://translating.homeaffairs.gov.au/en>).

Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan khayaarada kale ee tarjumaadda adoo la xiriiraya [Hay'adda Aqoonsigooda Qaran ee Turjumaanada iyo Fasiraayaasha \(NAATI\)](#) (<https://www.naati.com.au/>).

## Ma bixisaa macluumaad iga caawin kara helitaanka turjumaanka telefoonka?

Haa. TIS National waxay bixisaa macluumaad kala duwan oo la tarjumay si ay uga caawiso dadka aan Ingiriiska ku hadlin helitaanka turjumaan. Ka eeg macluumaadka la heli karo ee loogu talagalay dadka aan Ingiriiska ku hadlin ee ku jira [liiska waraaqaha xayasiiska](#) (<https://www.tisnational.gov.au/About-TIS-National/Materials-to-help-you-access-an-interpreter>).

## TIS National ma haysataa fiidiyowyo waxtar leh?

Haa. TIS National waxay soo saartay [fiidiyowyo waxbarasho](#) (<https://www.tisnational.gov.au/Help-using-TIS-National-services/Videos/New-Standard-page-base.aspx>) si ay ugu caawiso macaamiisha inay isticmaalaan adeegyadayada.

## Waa maxay doorka turjumaanka TIS National?

Doorka turjumaanka waa inuu ku turjumo ereyga lagaga hadlay luqadaada sida ugu saxsan oo macquul ah.

Turjumaanadu ma bixiyaan talooyin waana inaysan weydiin su'aal kale oo aan ka ahayn wixii uu ka codsaday xiriiriyaha TIS National ama qofka aad la xiriirayso.

Turjumaanada TIS National waxay ku xiran yihiin xeerka adag ee anshaxa. Xeerkani wuxuu xukumaa dhaqankooda xirfadlenimo wuxuuna koobaya waajibaadyo kala duwan oo ay ka mid yihiin

- dhaqanka xirfadlaха
- qarsoodinimo
- kartida
- dhexdhedaadnimo
- saksanaanta
- caddayn xuduudaha kaalinta
- In la ilaaliyo xidhiidhada xirfadeed
- Horumarin xirfadeed
- Midnimada-xirfadeed.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerka anshaxa waxaa laga heli karaa website-ka [Australian Institute of Interpreters and Translators \(AUSIT\)](#) (<https://ausit.org/code-of-ethics/>)

## Sidee ugu fiican oo aan u isticmaali karaa turjumaanka?

Waxaad u isticmaali kartaa turjumaanka TIS National sida ugu wuxtarka badan leh:

- Adoo diyaarsada dhammaan macluumaadka aad uga baahan tahay wicitaankaaga ka hor intaadan wacin TIS National
- adigoo dulqaata oo suga tarjumaanka si uu u dhammeeyo hadalka kahor intaadan hadlin mar labaad
- adigoo isticmaalaya jumlado gaaban
- adoon isticmaalin hadal qalafsan ama kakan oo ay adag tahay in la turjumo
- adoo fahma doorka turjumaanka
- Inaadan turjumaanka weydiisan talooyin ama inuu kuu doodo
- Inaad isla markiiba u sheegto turjumaanka, haya'dda ama TIS National haddii ay kugu adkaato inaad fahamto turjumaanka

# Sidee baan u siiyaa jawaab-celin TIS National?

TIS National waa adeeg bixiyaha luqadda ee Wasaaradda Arimaha Gudaha. Qaybta [Jawaab celinta Caalamiga ah \(GFU\)](https://www.homeaffairs.gov.au/help-and-support/departmental-forms/online-forms/complaints-compliments-and-suggestions) (<https://www.homeaffairs.gov.au/help-and-support/departmental-forms/online-forms/complaints-compliments-and-suggestions>) waa barta dhexe ee helitaanka dhammaan jawaab celinta waaxda, oo ay ku jiraan adeegyada ay bixiso TIS National.

Gudaha TIS National, waxaan qiimeynaa jawaab celinta macaamiisheenna, maadaama ay naga caawineyso inaan horumarinno shaqadeena oo aan kor u qaadno tayada adeegyada tarjumaadda ee aan u qabano dowladda, ganacsatada iyo bulshada, iyada oo loo marayo bixinta adeegyo luqadeed oo la aqoonsan yahay, qimo-ku-ool ah oo aamin ah.

Macaamiisha TIS National ee xaddidan ama aan lahayn xirfadaha luqadda Ingiriisiga waxay ku soo gudbin karaan jawaab celin ku saabsan adeegyada TIS National khadka tooska ah ama taleefan ahaan. Si aad ra'yi uga dhiibato khadka tooska ah, fadlan gal Waaxda [Amaan, cabashooyinka iyo soo-jeedimaha \(Compliments, complaints and suggestions\)](https://www.homeaffairs.gov.au/help-and-support/departmental-forms/online-forms/complaints-compliments-and-suggestions) (<https://www.homeaffairs.gov.au/help-and-support/departmental-forms/online-forms/complaints-compliments-and-suggestions>). Haddii aad u baahan tahay afcelin, fadlan ka wac TIS National 131 450 una sheeg hawladeenka inaad jeelaan lahayd inaad ka bixiso jawaab-celin ku saabsan TIS National. Hawl wadeenadeena ayaa diiwaangelin doona ra'yi celintaada waxayna u gudbin doonaan kooxda ay khuseyso ee TIS National si wax looga qabto

## Waxaan u baahanahay inaan isticmaalo turjumaan si aan uga hadlo rabshada qoyska. Ma jiraan wax macluumaaad ah oo i-taageeri kara?

Dawlada Australia waxay diyaarisay Xidhmada Badbaadada Qoyska iyada oo uu la socdo macluumaaad ku saabsan sharciyada Australia ee ku saabsan rabshadaha qoyska iyo guriga, xadgudubka galmada iyo guurka qasabka ah, iyo xuquuqda haweenku u leeyihii inay nabdoonaadaan. Xidhmada waxaa ku jira afar xaashiyaha macluumaaadka ah iyo boodhka sheekada, oo lagu turjumay 46 luuqadood. [Xidhmada Badbaadada Qoyska](https://www.dss.gov.au/family-safety-pack) (<https://www.dss.gov.au/family-safety-pack>) waxaa laga helayaa websiteka Wasaaradda Adeegyada Bulshada.

Kaabidda Xidhmada Badbaadada Qoyska waa tarjumaada [xaaladaha rabshadaha qoyska](https://www.dss.gov.au/women-programs-services-reducing-violence-family-safety-pack/interpreting-in-domestic-violence-situations) (<https://www.dss.gov.au/women-programs-services-reducing-violence-family-safety-pack/interpreting-in-domestic-violence-situations>) iyo turjumaanada iyo [nabadgelyada qoyska](https://www.dss.gov.au/women-programs-services-reducing-violence-family-safety-pack/interpreters-and-family-safety) (<https://www.dss.gov.au/women-programs-services-reducing-violence-family-safety-pack/interpreters-and-family-safety>) ee waraaqaha macluumaaadka oo loogu talagalay kor u qaadida wacyigelinta doorka iyo mas'uuliyadda turjumaanka ee xaaladaha rabshadha guriyeed.

## Xaq ma u leeyahay in aan ku barto Af-Ingiriisiga bilaash?

Barnaamijka Af-Ingiriisiga Muhaajiriinta Qaangaadhka ah (AMEP) wuxuu bixiyaa [barashada luuqadda Af-Ingiriiska ah oo bilaas lacag ah](https://immi.homeaffairs.gov.au/settling-in-australia/amep/about-the-program) (<https://immi.homeaffairs.gov.au/settling-in-australia/amep/about-the-program>) dadka muhaajiriinta ah ee xaga u leh si looga caawiyo dagitaankooda iyo ka qaybqaadashada bulshada Australiya.

AMEP waxaa heli kara muhaajiriinta ka weyn 18 sannadood ee qoyska, fiisooyinka xirfadaha leh iyo fiisooyinka ban'iadamnimada, oo ay ku jiraan kuwa haysta fiisooyin joogto ah iyo sidoo kale fiisooyin ku meel gaar ah. Dadka ku xidhan dadka heysta fiisooyinka u-qalma ayaa awooda inay waxbartaan iyo muhaajiriinta 15-17 jirka ahina waxay sidoo kale ka qaybqaadan karaan xaaladaha qaarkood. Xannaanada carruurta oo bilaash ah ayaa loo heli karaa fasallada fool-ka-foolka ah, ee loogu talagalay dadka leh carruurta ka yar da'da iskuulka.

AMEP waxay leedahay fursado waxbarasho oo dabacsan oo kaa caawinaya inaad barato Af-Ingiriisiga, oo ay ku jiraan fasalo fool-ka-fool ah (COVID-safe), fasalo khadka tooska ah, tababarayaal mutadawiciin ah iyo barashada lagu barato meesha fog. Maalinwalba, maalmaha qaarkood, fiid iyo wiik dhaaand kiisa ayaa laga yaabaa in la helo iyadoo kuxiran meesha aad ku nooshahay.

Si aad u ogaato sida loo bilaabo barashada Af-Ingiriisiga bilaash ka ah, la xidhiidh kuwa kuugu dhow [AMEP bixiyaha](#) (<https://immi.homeaffairs.gov.au/settling-in-australia/amep/service-providers>) or go to [www.homeaffairs.gov.au/amep](http://www.homeaffairs.gov.au/amep)